

# Wajiga 1aad ee cusub ee Nicollet

Hindisaha A: Aeon



Sawir muujinaya sida dhismuhu u ekaan karo. Muuqaalku waa dhinaca dhismaha ee ku wajahan jardiinada mustaqbalka.

## Kooxda horumarinta

- Hormuudka Horumarinta iyo milkiilaha guriyeynta oo la awoodi karo: [Aeon](#)
- Milkiilaha/hawl-wadeenka horumariya tafaariiqda: [Horumarka Guryaha Guryaha ee Farshaxan ee La-shaqayn karo \(Occupiable Art Real Estate Development\)](#), horumariyaha soo baxaya
- Bulshada ku adeegta si aan faa'iido doon ahayn: [Naadiga Wiilasha & Gabdhaha ee Magaalooyinka Mataanaha ah](#) (Boys & Girls Club of the Twin Cities, BGCTC),

## Hindisaha oo kooban

Mashruuca waxaa ka mid ah:

- 76 guri (apartment), dhamaantood waa la awoodi karaa
- Hal (1) Goobta tafaariiq oo ku yaalla koonaha goobta
- Meel gudaha ah oo loogu talagalay barnaamijyada guddiga beeraha nasashada iyo madadaalada ee Minneapolis (MPRB).
- Hal (1) urur oo aan faa'iido doon ahayn ayaa bixin doona adeegyada bulshada
- 141 meelaha baabuurta la dhigto (20 waxay la siman yihiin dhulka, 121 dhulka hoostiisa ayay ku yaallaan)
- Meesha ay ku soo degaan dadka isticmaalaya dhismaha
- Jidka loogu lugeeyo meesha baabuurta la dhigto ilaa beerta nasashada
- Tamarta Geothermal ka iyo nidaamka biyaha roobka
- Dhismo shan (5) dabaq ah
- Meel bannaanka ah oo ku taal saqafka sare ee dusha sare ka eegaysa beerta nasashada.




Sawir muujinaya sida dhismuhu u ekaan karo. Muuqaalku wuxuu ka yimid geesta Nicollet Ave. & Lake St.

**FIIRO GAAR AH: SAWIRADA KU JIRA SOO HINDISAHA WAXA LOOGU TALAGALAY UJEEDDOYIN TUSAALEYN OO KELIYA; MASHRUUCA UGU DAMBEEYA WUXUU U EKAAN KARAA MID KA DUWAN. TIROOYINKA KU JIRA HINDISAHAN AYAA LAGA YAABAA INAY ISBEDDELAAN MARKA NAQSHADEYNTA LA HUFO.**

For reasonable accommodations or alternative formats please call 311 at 612-673-3000. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. Para ayuda, llame al 311. Rau kev pab, hu 311. Hadii aad caawimaad u baahantahay, wac 311.

## Isticmaalka guud ee dhismaha & cabbirrada



## Bulsho ku adeegaysa goob aan faa'iido doon ahayn

### Naadiga Wiilasha & Gabdhaha ee Magaalooyinka Mataanaha ah

waxa uu bixiyaa barnaamijyo bilaash ah sanadka oo dhan oo carruurta iyo dadka waaweyn ah. Waxay u rari doonaan xafiisyadooda ugu muhiimsan goobtan oo ay ku yeelan doonaan booskooda. Booskooda waxaa ka mid noqon doona:

- Qolalka waxbarashada iyo akhriska
- Xarunta tignoolajiyada dhalinyarada
- Sayniska, Tignoolajiyada, Injineerinka, iyo Shaybaarka Xisaabta (STEM)
- Goobta jimicsiga
- Kushiinka ganacsiga iyo qolka cuntada
- Meel gudaha ah oo loogu talagalay inay dadku ku kulmaan ayaa diyaar u ah bulshada
- Goob xafiiska

## Ganacsiyada tafaariiqda

- Goobta ganacsiga tafaariiqda waxaa lagu qorsheeyay dhanka geeska mashquulka badan ee Nicollet Ave. & Lake St. Waxa lahaan doona oo maamuli doona [Occupiable Art Real Estate Development](#).
- Meesha waxa loo qaybin karaa laba ama saddex dukaan oo yaryar. Dabacsanaantu waxay u fududaynaysaa oo in badan aad u awoodi doontaa ganacsiyada yaryar ee maxaliga ah inay u soo guuraan.

## Qorshaha Mudada Dheer

- Mashruucu waxa uu hiigsanayaa inuu isticmaalo hababka kulaylka dhulka iyo biyaha roobka ee la wadaago. Nidaamyadani waxay isticmaali karaan beerta nasiinada dadweynaha ee dhow.
- Kooxdu waxay rajaynaysaa inuu mashruucan waafaqo yoolalka SB2030 (ama heerarka la midka ah ee kaydinta tamarta ee guryaha).

## Guriyeynta & la awoodi karo

	30% AMI*	50% AMI*	60% AMI*	WADARTA
1 qol	-	12	-	12
2 qol	9	-	31	40
3 qol	11	-	13	24
4 qol	-	-	-	0
<b>WADARTA</b>	<b>20</b>	<b>12</b>	<b>44</b>	<b>76</b>

\* Celceliska Dakhliga Aagga (AMI): heerka dawladda dhexe ee go'aaminta cidda u qalanta in ay ku noolaato guryo la awoodi karo. AMI waa barta dhexe ee qaybinta dakhliga gobolka. Tirooyinkani sannad walba way isbeddelaan. Kirada guryaha la awoodi karo waxay ku salaysan tahay Dakhliga Dhexdhexaadka ah ee aagga (AMI). Kirada % AMI hoose waxay ka dhigan tahay in gurigu uu awoodi karo qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Daawo [muuqaal](#) si xog dheeri ah.



Hindisaha qorshaha dabaqa koowaad